

# TILMAAMAHA LA SIIYO BUKAANKA DAWEYNTA WADNAHA IYO XIDIDDADA WADNAHA KLIINIKADA MANKATO

## BAARISTA TILMAAMAHA CIRIBTA (ANKLE-BRACHIAL INDEX TEST) (ABI)

Ankle-Brachial Index (ABI) Test - Somali

Bukaanka: \_\_\_\_\_ Taariikhda Ballanka: \_\_\_\_\_

Wagtiga Imaashada: \_\_\_\_\_ am/pm

Goobta: Waaxda Wadnaha Kliinikada Mankato  
1230 East Main Street, Mankato, MN 56001

### Macluumaadka Ballanka

Qiyaas ahaan, ballankaan wuxuu qaataa 1 saac.

### Maxay tahay sababta ley siiyo ABI?

Baarista tilmaamaha ciribta (ankle brachial index) (ABI) waa hab degdeg ah, aan gudaha gelin, oo lagu qiimeeyo halista aad uga jirtid cudurka xididdada qeybaha ka fog wadnaha (PAD). PAD waa xaalad keenta in xiddidada lugaha iyo ciribta soo dhuubtaan. Dadka qaba PAD waxay halis uga jiraan in laga qabto wadnaha, dhiig ku furmo madax iyo dhiigga oo si liidato ugu wareegta jirka.

### Baarista ka hor:

Guud ahaan, looma baahna in aad raacdid tilmaamo khaas ah ka hor inta aan la gaarin ballanka aad ku qaadaneysid baarista ABI. Waxaa lagu talliyaa in bukaanka uu baarista u soo qaato ama keeno surwaal dabagaab iyo shaati gacmo gaab.

### Inta ay socoto baarista:

- Bukaanka waxaa la weydiin doonaa in ay iska saaraan kabaha iyo kaalsada. Haddii ay la yimadaan dabagaab iyo shaati gacmogaab, wey qaadan karaan waqtigaan. Haddii aysan la imaanin labbis ay ku baddashaan, waxaa laga codsan doonaa in ay iska siibaan labbiska inta ka hooseyso dhexda.
- Haddii bukaanka uu haysto gacmo dheere, waxaa laga codsan doonaa in uu iska saaro shaarka. Bukaanka waxaa la siin doonaa goono la qaato.
- Kaddib, bukaanka wuxuu si fidsan u seexan doonaa sariirta, kaddibna waxaa gacanta kore looga dhajin doonaa qalabka lagu cabbiro cadaadiska dhiigga, cajarka, muruqa ka koreeyo ciribta iyo ciribta. Waxaa lagu weydiin doonaa in aad dhawaaq la'aan seexatid. Hadal kasta, qufac ama kor u qaadidda madaxa wuxuu saamayn karaa natiijada ka soo baxda baarista.
- Waxaa la heli doonaa cadaadiska dhiigga. Bukaanka wuxuu u baahan yahay in uu u sheego shaqalaha kliinikada meelaha xanuuna ee ka hooseeyo qeybta hoose.
- Waxaa kaloo la qaadi doonaa qoraalada cadaadiska dhiigga suulka weyn ee cag kasta.

### Baarista kaddib:

- Waxaa laga qaadi doonaa cadaadiska dhiigga kaddibna wuu labbisan doonaa bukaanka.
- Xafiiska bixiyahaada ee soo gudbiya dalabka wuxuu bukaanka kala xariiri doonaa natiijada.

Haddii aad u baahan tahay in aad dib u dhigatid ama joojisid ballanka, ama haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan baaristaan, fadlan wac 507-389-8519.

Fadlan iska xaadiri Diiwaan Gelinta Dhexe (Central Registration) ee goobtena Main Street, dabaqa kowaad.